



Taageerida Horumarinta luqada iyo hadalka caruurta



Cunuga luqadiisa hooyo waa midiisa muhiimsan. Waa luqada cunugu la wadaago/wadaagto waalidkiisa waana wadada dhaqan ama taariikh qof leeyahay.

Xirfadaha wanaagsan waa hab qofku uu ka helo luqadiisa hooyo saldhigna u ah dhamaan barashada oo ay ku jirto barashada luqada Finish-ka. Mar walba waa muhiim in waalidku kula hadlaan caruurtooda luqadooda hooyo intii ay bari lahaayeen luqada Finish-ka. Cunugu waxa uu ku baranayaa luqada Finish-ka Xanaanada iyo Iskuulka.

Waa muhim in xooga la saaro luqada hooyo oo la isticmaalo marka guriga la joogo. Haddii waalidku ay ku hadlaan luqado kale waa in mid walba uu luqadiisu kula hadlo cunuga. Xitaa hadii cunugu uusan ku fiicneen luqada ay waalidkiisu ku hadlaan, fahamka luqada ayaa koraya cunugana waxa uu ku guuleysanayaa in uu ku hadlo



Magaalada Helsinki

Waaxda Adeegyada Bulsahada iyo Caafimaadka
Daryeelka Caafimaad ee Cunuga iyo Shaqada Reerka

www.otakoppi-ohjelma.fi



MARKA CUNUGU OO SAQIRKA (AAD U YAR-YAHAY)

Waxaa wanaagsan in aad laabta ku heyso

Tusi cunugaaga in aad ku faraxsan tahay

In badan cunugaaga la hadal indhahana ka eeg

Marka aad cunugaaga wado tusaale ahaan marka aad dharka u gelineyso u sheeg waxa aad sameyneysa isla markaas.

Magacaw shey-yada walxaha iyo dadka hareerahaaga



MARKA CUNUGU UU GAARO XILIGA GAARIGA (GAARIGA CARUURTA LA SAARO)

Maalin walba kala hadal cunugaaga waxyaaba uu jecelyahay, hadaba wadadan waxa uu ku baranayaa ereyo cusub. Dhageyso sida cunuga uga jawaabo.

Marka aad xanaaneysid cunugaaga u sheeg waxa aad sameyneysid tusaale ahaan “aan kuu geliyo sigsaanta” waxyaabaha magacaw shey-yada xitaa firfircoonida and dareemada: *“hooyo wey ogtahay waad xanaaqsan tahay, maxaa yeelay...”*

Weydii cunugaaga waxyaabaha caanka tusaale ahaan *“aaway gaariga?”* ama *“caano miyaad rabtaa mise biyo?”*

Hees, dhaa-dhaanji luqadaadana cunuga kula ciyaar. Ciyaartu waxey muhim u tahay horumarka iyo barashada cunuga.

Ha sixin hadalka cunugaaga; intii aad sixi laheyd sii tusaale wanaagsan oo uu ku hadli karo. Cunugu waxa uu leeyahay *“boo”* qofka weyna waxa uu leeyahay *“haa, goor dhaw waxa aan aqrin doonaa buug cusub”*

Cunugaagu waxa uu baranayaa ereyo cusub marka aad buuga isla eegtaan. U sheeg cunuga sawirada ku jira buuga una sheeg sheekooyin ku saabsan caruurnimadaada iyo guriga, tusaale ahaan.

Fahamka cunuga ayaa koraya marka aad u dirto howlo yar sida *“ii keen koofida”* ama *“I tus halka kabtu taalo”*

Kaliya TV in la daawado TV, Fiidiyow iyo DVD ama kombiyuutarka oo lagu ciyaaro kuma filna in ay kobciyaan xirfadaha luqada ee cunuga!

MARKA CUNUGU BARANAYO LUQADA FINISH-KA TUSAALE AHAAN XILIGA XANAANADA

Ugu jawaab cunuga luqadaada hooyo xitaa haddii cunugu uu isticmaalayo afka Finish-ka marka uu hadlayo.

Haddii cunugu uusan erey garan oo uu Finish ku hadlo, waalidka waa in ay ereyga ugu celceliyaan iyaga oo ku hadlaya afkooda hooyo.